

Qisada Nabi Ibraahim iyo Sunada Odxada

Qisada Nabi Ibraahim calayhi salaam waxa ay ku jirtaa qisooyinka kusoo arooray quraanka kariimka ah, suurado kala dhawr ahna lagaga waramay siyaabo kala duwan, hadaba halkan waxa aan kusoo qaadanaynaa qayb kooban oo ka mida qisooyinkiisa , waana midii dhex martay isaga iyo wiilkiisa ismaaciil -NNKH labadoodabee- ee ku saabsanayd in lagu amray inuu wiilkiisa gawraco(bireeyo), Qisadani oo raadkii ay ka tagtay noqday Sune joogto ah, ilaa maantana ay ku dhaqmaan Sunadaas dadyowga muslimiinta ah meel ay joogaanba, magaceedana loo yaqaano Odxada, oo ah wankii lagu furtay Birayntii lagu samayn lahaa Nabi ismaaciil - calayhi salaam-. Waxaana Sune ah in ruux walba oo awood u leh odxadaas uu sameeyo oo uu gawraco neef xoolo ah, Maalinta Ciida Salaada kadib, waana mid loogaga dayanayo, Nabigeenu Calayhi salaatu wasalaam sameeyay, isagoo yidhi markii uu gacantiisa ku qalayay odxada oo ahaa Neef-Wana: (Bismilaah Allaahu Akbar, Kani waxaan ka qalay aniga iyo cidii kale ee umadayda ah een odxayn).

Qisadaas waxaa laga qaadanaynaa duruus iyo cibrooyin waawayn, waxaa kamida duruustaas:

- **Dhabnimada riyada Nabiyada:** Nabi ibraahim Calayhi salaam wuxuu Manaam ku arkay isaga oo wiilkiisa gawracaya oo biraynaya, (wiilkaygoow waxa Manaam laygu tusay aniga oo ku gawracayo) aayada (١٠٢) suurada saafaat.

- **Intixaankii waynaa:** ilmihii uu sugayay Nabi Ibraahim calayhi salaam mudo ٦٠ sano ah , ayaa hal mar lagu yidhi: gawrac, ma intixaan ka wayn ayaa jira midaas? Ilaahay koreeye wuxuu yidhi: (Kaasi waa intixaan wayn) aayada (١٠٦) Suurada Saafaat. Ilaahayna koreeye cida uu intixaamo wuxuu ugu kordhiyaa darajo, ama waxaa looga dhaafaa dambiyo, sidaa awgeed ayay abiyadu ugu intixaan badan yihiin bili'aadamka.

- **Xidhiidh qoto dheer:** Xidhiidhka ka dhexeeyay Nabi Ibraahim iyo wiilkiisa Ismaaciil (NNKH labadoodabee) wuu ka waynaa aabonimo kaliya, waxayna ahaayeen labo wada tashada oo wada shaqeeya, sidaa awgeed ayuu Ibraahim kala tashaday ismaaciil birayntii lagu fulinayay, markaasna ay isla qaateen, (wiilkaygiyow waxaan ku arkay Manaam aniga oo ku gawracaya) ismaaciilna wuxuu ugu jawaabay (Aabe fuli wixii aad aragtay) aayada (١٠٢) suurada Saafaat.

- **Is qancinta iyo wada hadalka:** Nabi Ibraahim CS. si uu u qanciyo wiilkiisa ayuu la furay wadahalal lagu gorfaynayo sidii loo fulin lahaa gawraca(biraynta) ismaaciil. (Wiilkayow waxa aan Manaam ku arkay aniga oo ku biraynaya ee aragtidaadu waa maxay, wuxuu yidhi- ismaacil- aabahayow fuli wixii lagu maray), Mana doonin in si qarsoodiya uu u hoos galiyo amarkaas, oo uu fuliyo isaga oo war moog ah.
- **Adeecnimada:** Markii Nabi Ismaaciil Aabihii oo Ibraahima -calayhima salaam labadoodabee- usoo bandhigay wixii Ilaahay sareeye- ku amray oo ah: inuu gawracayo, kama hor iman ee markiiba wuu adeecay una hogaansamay hadalkii aabihii isagoo leh (Aabehayow fuli wixii lagugu amray).
- **U hogaansamida amarka Eebe:** Culimadu waxay yidhaahdaan, islaamnimada macnaheeduba waa in loo hogaansamo amarka Ilaahay koreeye, xataa hadii uuna ruuxu garanayn ujeedada ka danbaysa amarkaas, sidaa awgeed ayaa lagu amaanay Labda Nabiba inay noqdeen kuwo u hogaansamay amarkii adkaa (markii ay hogaansameen ee dhinaca dhulka loo dhigay, ayaan u

dhawaaqnay) aayada (١٠٣-١٠٤), , suurada Saafaat. Ilaahayna wuxuu u qiray in hogaansamida amarkiisu leedahay amaan gaar ah, waxaana la sheegay in midii uuni goyn kari wayday qoortiisa.

➤ **Abaal marin:** Amar qaadashadii uu sameeyay Nabi Ibraahim Calahi salaam, waxa ay keentay in lagu yidhaahdo Nabi ibraahim Cs, (waad Rumaysay Manaamkaagii,) wuuna helay abaal marin dagdaga oo gawracii wiilkiisii waxaa lagu furtay Wan laga keenay samada, taasi oo noqotay sune joogto ah, Waxaa kale oo Ilaahay koreeye ku yidhi: (Sidaas ayaan ku abaal marina kuwa Muxsiniinta), aayada (١٠٥), Suurada Saafaat. Magacaas Muxsin ka loogu yeedhayna waa abaal marin xaga Ilaahay Koreeye kaaga ahaatay.

➤ **Sabirka iyo Naf hurida:** Nabi ismaaciil markii uu maqlay in la gawracayo wuxuu ku jawaabay (Aabe fuli wixii lagu amray aniguna waan ku samrayaaye). Aayada (١٠٦) Suurada Saafaat. Waa tusaale wayn oo loo soo qaato sida uu naftiisa u huray ee uu sabir ku qaabilay.

➤ **Maamuus iyo karaamayn wayn:** Nabi Ibraahim NNKH, markii uu qaatay amarkii gawraca, fulintiisana

guda galay, waxaa loo bishaareeyay inuu helayo wiil kale oo barako leh, oo Isxaaq la dhaho, waliba nabina laga dhigi doono. (waxaan u bishaaraynay Isxaaq oo Nabi ah, kana mida Saalixiinta) aayada (١١٢) suurada Saafaat.

➤ **Magac-reeb:** Qisadii Nabi Ibraahim calayhi salaam waxay dhaxal reeb u noqotay jiilba jiilkii uu ka dambeeyay, waana la xusi doonaa magiciisa ilaa maalinta qiyaame. Ilaahay baa koreeye yidhi: (Magac iyo Maamuus ayaan uga tagnay inta dambe) aayada (١٠٨), suurada Saafaat.

Ilaa maantana Ajar ayuu ku leeyahay Nabi Ibraahim CS, Sunadaas la fulinayo ee Gawraca ah.